

# Dadka uu kiiskoodu dublinka yahay oo laga caawinayo in ay laabtaan

Haddii lagaa gaaray go'aan ah in dal kale lagugu celiyo, waa in aad aaddaa dalkaas ka baaraandegaya codsigaaga magangelyada.

Haddii aad rabto waxaad dooran kartaa in aad ku laabato dalkaagi hooyo. Markaas waxaad codsan kartaa in lagaa caawiyo sidii aad dalki ugu laaban lahayd oo aad halkaas nolol cusub uga billaabi lahayd.

## Waxaa lagu siin karaa

- caawin ah sidii aad ku heli lahayd baasaboor iyo warqado socdaal
- tigidh diyaaradeed
- talabixin ay Norway kugu siinayso International Organization for Migration (IOM).
- 7 000 oo karoon haddii aad 18 sano ka weyn tahay.
- 2 000 oo karoon haddii aad 18 sano ka yar tahay marka aad codsanayso in laabashada lagaa caawiyo.

Arrintani waxay khusaysaa haddii aad oggolaasho joogitaan ka haysato dal Yurub ah ama dalal gaar ah oo kale, warbixin intan ka badan ka eeg [udi.no](http://udi.no)

## Lacag dheeri ah ayaa laysku siinayaa haddii la keeno waraaqo socdaal oo shaqaynaya

Marka aad soo codsanayso in lagaa caawiyo sidii aad ku laaban lahayd haddii aad keentid baasaboor shaqaynaya, waxaad heli kartaa 5 000 oo karoon oo dheeri ah. Tani waxay sidoo kale khusaysaa haddii aad hadda ka hor keentay baasaboor kaas oo weli shaqaynaya.

## Waa in aad degdeg u baxdaa

Wakhti gaaban ayaa laysu qabtaa in aad ugu laabato dalka Yurub-ta ah ee codsigaaga ka baaraandegaya. Haddii aad haddaba doorbidaysid in aad ku laabato dalkaagi hooyo waa in aad si degdeg ah u keentaa waraaqo socdaal oo aad aaddaa dalkaagi hooyo. Marka aad IOM ka codsato in lagaa caawiyo sidii aad ku laaban lahayd ayaa lagu

qaban doonaa muddo aad hawshan ku  
fulinayso.

## Sidan ayaad u codsanaysaa

Foomka codsiga waxaad ka helaysaa  
[www.iom.no](http://www.iom.no)

Teleefan bilaasha ah ka wac IOM: +47 23  
10 53 20

Waxaad sidoo kale iimayl ugu diri kartaa  
[iomoslovarp@iom.int](mailto:iomoslovarp@iom.int)